

Waxyaabaha ku Saabsan Qofka ku Deeqaha Caanaha Aadanaha ee jeermiska Laga Dilay

Qoysaska Muslimka ah

Xaashidan xaqiiqda waxa loogu talagalay qoysaska muslimka ah ee qaba su'aalo ku saabsan qofka ku deeqaha caanaha naaska (caanaha naaska ee jeermiska Laga Dilay). Mararka qaarkood, hooyooyinku ma lahaan karaan dhamaan caanaha ilmahoodu u baahan yahay. Isticmaalka caanaha naaska ee qof ugu deeqay waa mid kamid ah hababka ugu wanaagsan ee lagu siin karo dhalaankaaga cusub bilow caafimaad qaba oo nololsha ah.

Waa maxay Caanaha Aadanaha ee jeermiska Laga Dilay ee Qofka ku Deeqo?

Midani waa caanaha hooyooyinka caafimaadka qaba si xor ah u siinaya caanahooda naaska dheeraadka ah kaydka caanaha si ay u caawiyaan dhalaanka kale. "Jeermiska Laga Dilay" macneheedu waa in caanaha la kululeeyo si looga saaro jeermiska waxyeelada leh ee ilmaha u keeni kara jirro.

Caanaha waa mid badqab u leh xiitaa dhallaanka yaryar, kuwa buka, ama kuwa aadka u yaryar. Xaalado badan, caanaha qof ku deeqo ayaa badbaadin kara nololsha ilmaha.

Maxay hoogaamiyayaasha islaamku ka dhaheen ku deeqitaanka caanaha hooyada ee jeermiska laga dilay?

Hogaamiyayaasha Islaamka ayaa soo saaray fatwo, taasoo ku salaysan wada hadal ay la yeesheen golaha Islaamka ee Minnesota iyo khubarada caafimaadka.

Waa kuwan waxa ay Fatwadu ka tiri ku deeqitaanka caanaha bini'aadamka ee jeermiska Laga Dilay:

- Carruurta waa inay helaan caano uu ugu deeqo qof kale marka ay ka waayaan caanaha hooyadood, ama marka caanaha hooyadood aanay ku filnayn.
- Aad ayay muhiim ugu tahay dhalaanka dhasha ka hor 37 todobaad, kuwa jiran, ama kuwa ku dhasha miisaan aad u hooseeya.
- Islaamka, wadaagitaanka caanaha waa ajir.
- Qaraabanimada aad ayay u adag tahay, sababtoo ah caanuhu waa isku dhafka caanaha hooyooyin badan. Tani waxay ka ilaalinaysaa dhalaanka inay caano badan ka helaan hal qof oo caano ku deeqa.

Caanaha ma yihiin kuwa badqab u leh ilmahaaga?

Haa! Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee tababaran ayaa si taxadar leh u waraysta oo baara hooyooyinka ku deeqaha caanaha. Tani waxay aad hoos u dhigtaa fursadaha caanuhu ay ku yeelan karaan cuduro, jiro, daroogo, ama khamriga aad ugu yar. Waxay sidoo kale baaraan caanaha inay badqabaan oo ay nafaqo u roon yihiin. Maraykanku wuxuu leeyahay sharciyo adag oo ku saabsan sida caanaha oo jeermiska looga dilo oo loogu kaydiyo caanaha. Dhab ahaantii, xeerarka ku-deeqitaanka caanaha ayaa ka adag xeerarka ku deeqitaanka dhiiga.

Agabkan waxaa loogu talagalay isticmaalka macluumaadka guud oo kaliya; waa inaad la xiriiirtaa dhakhtarkaaga si aad u hesho hagitaan ku saabsan isticmaalka PDH ee ilmahaaga. Agabkani ma'aha mid lagu badalayo talloboxin caafimaad oo xirfadle ah, cudur ogaanshaha, ama daaweynta. Iyaga oo ay iskaashanayaan Fairview Health Services, Jaamacadda Minnesota, Children's Minnesota, Minnesota Milk Bank for Babies, Brighter Health MN, iyo Minnesota Breastfeeding Coalition; Xuquuqda daabacaada qoraalka waxaa si wadajir ah u leh dhinacyadan (© 2024). Shakhsiyaadka iyo ururadu waxay soo saari karaan oo u qaybin karaan qoraalkan qaab kasta, oo aan la badali karin, isticmaalka aan ganacsiga ahayn. Dhamaan xuquuqaha kale way dhowrsar yihiin. SMARTworks 526073so-07/24.



NorthernStar
MOTHERS MILK BANK

Ha ka walwalin in ilmahaagu la siiyo waxyaabaha hilibka doofaarka iyadoo looga dhigayo caanaha lagu deeqay. Hilibka doofaarka ayaa si buuxda loogu burburiya caloosha hooyada kudeeqday caanaha mana gaaro caanaha.

Sidee caanaha bini'aadamka ee lagu deeqay ee jeermiska laga dilay u ilaalinayaan caafimaadka ilmahayga?

- Ilmahaaga ayaa si fiican looga ilaalin doona caabuqyada, xitaa kuwa nafta halis gelinaya.
- Jirka ilmahaaga ayaa si fiican u dheefshiida caanaha lagu deeqay si ka fiican caanaha gasacadaha ee ilmaha.
- Caanaha lagu deeqay ayaa kaa caawinaya ilaalinta mindhicirka ilmahaaga waxayna ka hortagi karaan cudur daran oo loo yaqaan NEC (necrotizing enterocolitis).


Sidoo kale, cilmi-baaris caafimaad ayaa muujisay in marka dhalaanku helaan caanaha lagu deeqay, in badan oo iyaga kamid ah ay ka baxaan isbitaalada iyagoo helaya caanaha hooyadood. Tani waa war aad ugu wanaagsan dhallaanka iyo qoysaska.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato

Halkan waxaa ku jira lifaaqa fiidiyowyada ku saabsan Fatwada oo ku qoran Af-ingiriis, Af-soomaaliga, iyo Carabi. Riix lifaaqa ama ku iskaan garee khoo dhka QR kamaradaada talefoonkaaga casriga ah.

bit.ly/3S17kfG

Macluumaad iyo kheyraad kale ayaa diyaar u ah qoysaska Islaamka ah iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka.



Riix lifaaqa ama iskaan gaare koodka QR si aad macluumaad badan uga ogaato caanaha bini'aadamka deeqaha ee Minnesota:

bit.ly/3LnpDIn

